



Daahirnimadu waa iimaanka barki, alxamdu lillahina miisaanka ayey buuxisaa, ama subxaana Allaah iyo alxamdulilah waxay buuxiyaan inta u dhaxaysa samooyinka iyo dhulka

Abii Maalik Alashcari Allaha ka raali noqdee wuxuu yiri: Rasuulkii Ilaahay naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate wuxuu yiri: Daahirnimadu waa iimaanka barki, alxamdu lillahina miisaanka ayey buuxisaa, ama subxaana Allaah iyo alxamdulilah waxay buuxiyaan inta u dhaxaysa samooyinka iyo dhulka, salaaduna waa nuur, sadaqaduna qofka xujo ayey u tahay, sabirkuna waa iftiin, Quraankuna xujo ayuu kuu noqdaa ama xujo ayuu kugu noqdaa dadka oo dhan way kalahaan, qof walbana wuxuu samaynaayo ayuu naftiisa ku iibsaday markaasaa dadku waxay noqonayaan mid naftiisa xoreeya ama halaaga.

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee wuxuu sheegay in dhaarada muuqataa ay tahay weysada iyo qubayska waxayna shardi u tahay salaada. Erayga alxamdu lilaahi waxay buuxisaa miisaanka waana amaanta Ilaahay isagaa nusqaan ka hufane, iyo in lagu sifeeyo sifaadka kaamilka ah, maalinta qiyaame waa la miisaamin waxayna buixin miisaanka camalka. Erayga subxaana Allaah iyo Alxamdu lillaah waa Ilaahay oo laga hufo wax kastoo naaqus ah, iyo in ilaahay lagu sifeeyo kaamilnimo oo dhan, taasoo u qalanta ilaahay waynakiisa, Isagoo la jecel yahay lana weyneynayo, taasi waxay buuxisaa inta u dhaxaysa samooyinka iyo dhulka. Salaadu nuur ayey u tahay adoonka qalbigiisa, wejigiisa, qabrigiisa, iyo markuu maxsharka imaanayo. Sadaqadu waxay muminka u tahay xujo waxayna dalil u tahay in iimaankiisu run yahay kana duwan yahay munaafiqaa aan rumaysnayn ajarka loo balan qaaday. Sabirku waa iftiin, waana naftoo laga xabiso argagaxa iyo carada, waana nuur uu la socdo kulayal iyo gubasho sida iftiika qoraxdoo kale, waayo sabirku waa dhib u baahan la dagaalanka nafta iyo in loo diido waxay rabto, qofka sabrayaa wuxuu ahaanayaa mid sabirku iftiinsada oo ku hanuuna oo si sax ah u toosnaada, sabirku waa in lagu sabro daadcada ilahay, macsida oo laga sabro, musiibda oo lagu sabro iyo noocyada dhibaatooyinka Adduunka oo loo adkaysto. qur'aanku akhriskiisa iyo ku camal falkiisa ayuu xujo kuugu noqon, hadii aad akhrin waydo ama ku camal fali waydona xujo ayuu kugu noqon. Nabigu naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee ka dib wuxuu sheegay in dadka oo dhan soconayaan oo faafayaan oo hurdadooda ka toosayaan oo guryahooda uga soo baxayaan shaqooyin kooda kala duwan. dadka waxaa ka mid ah qof ku toosan daacada Ilaahay oo naftiisa naarta ka xoreynaya, waxaa kaloo ka mida mid xaqa ka leexaday oo macaasida ku dhacaya oo naftiisa naar ku halaagaya.

النّجَاةُ الْخَيْرِيَّةُ
ALNAJAT CHARITY

